

Habka ilma-iska soo-ridida – daawada

Ilma-iska-soo-ridida Daawada ah waa hab aad si ula kac ah ku soo-ridayo ilmaha

Talaabada ugu horraysaa waa inaad ballan samaysato si aad u hesho talo caafimaad oo dakhtareed. Kalkaaliso caafimaad ayaa lug ku yeellan karta. Inta lagu jiro talabixintaan mihnadlayaasha ayaa:

- Ta'kiidin doona habkaan haddii habkaani kugu haboon yahay
- Sharxaya habka ilma iska soosaarista daawada
- Kaala hadalaya qorshahaaga guriga si lagu caawimo
- Samaynaya qorshaha ilma-iska soo-ridida haddii aad go'aansato inaad meel mariso, taas oo ay jirto qoritaanka daawooyinka aad u baahan tahay
- In lagu siiyo foomka ka raalinoqoshada si aad u saxiixdo.

Waxaa laga yaabaa in lagaa qaado ultrasound baaritaanka dhiigaga ama ballan kale.

Haddii aad ambaqaado inaad ilmaha iska soo rido, nadaamku wuxuu ahaanayaa sida soo socota:

- Waxaad ku qaadanaaya kaniiniga ugu horreeya (mifepristone), rugta caafimaadka ama guriga. Mifepristone oo horay loogu yiqiinay RU486) wuxuu joojiyaa uurka isaga oo xiraya ficilka hormoonka (progesterone) taas oo caawinta uurka.
- Waxaad qaadanaaya kaniiniga labaad (misoprostol) 24 ilaa 48 saacadood ka dib (badanaa guriga). Misoprostol waxay sababtaa in afka ilmagaaleenku ururo si uu meesha uga saaro uurka.
- Ilma iska soo saaridu badanaa waxay dhamaataa afar ilaa lix saacadood ka dib marka la qaato kaniiniga labaad (misoprostol). Intaas ka badan baa laga yaabaa inay qaadato.
- Waxaad badanaa u baahan tahay maalin ama labo oo nasniin ah ama dhaqdhaqaaqa oo la yareeyo.

Inta lagu jiro waqtiga daawada ilma iska soo ridida

Ka dib markaad qaadato kaniiniga misoprostol, waxaad filan kartaa inaad yeellato astaamaha soo socda:

- Yaqaqsi, hunqaaco, shuban, warwareer, madax xanuun iyo qandho (tan dumarku way ku kala duwan yihiin)
- Calool xanuun (caloosha) socda nus saac gudahiis (badanaa si ka xoogan xanuunka caadada) iyo dhiig bax socda hal ilaa afar saacadood ka dib (ka culus caadada). Mudaynta tani waxay noqon kartaa mid aan la saadaalin karin.
- Laba saacadood ka dib, dhiigbaxo badanaa wuu degaa wuxuuna gaara heerka caadada toban iyo lix iyo toban maalmood, qiyas ahaan.
- Dhiig aan joogto ahayn, oo aan la saadaalin karin ama sii dheeraada ayaa socon kara ilaa afar asbuuc ka dib daawada ilma iska soo saarida.

Daawada ilma iska soo ridida ka dib

Ka dib markaad qaadato daawada ilma iska soo saarida, waa in la xaqiijiyaa in baarida dhiiga iyo ballanta caafimaadka lala socdaa laba ilaa saddex asbuuc ka dib dhakhtarka ama rugta caafimaadka ee aad tagtay si loo xaqiijiyo in waxa la qabanayaa dhamaystiran yahay uurna aadan lahayn.

Si hoos loogu dhigo khatarta infakshanka asbuuca ka dambeeya ilma iska soo saarida, ha samaynin:

- inaad wax geliso siilkaaga, sida taamboonaaha
- inaad samayso galmood siilka ah
- inaad samayso wax da'daal siyaada ah u baahan, sida cayaaro ama qaadida waxyaalla culus, ilaa dhiigu ka istaago
- inaad dabaalato ama qubaysato (biyo waa isku shubi kartaa).

Dhibaatooyinka iyo Caqabadaha daawada ilma iska soo ridida

Dhibaatooyinka iska dhaca daawada dhiciska ka dib waxaa ka mid ah:

- xanuun majuujis ah oo ilmagaaleenka ku dhaca
- dhiig bax daba dheeraada oo aan joogto ahayn oo aan la saadaalin karin
- yaqyaqsi
- hunqaaco.

Caqabada waaweyn oo daawada ilma iska soo ridida badanaa ma dhacdo, waxaa ka mid noqon kara:

Caqabadaha	Astaamaha	Daaweynta
<p>Dhiigbax (dhiig bax aad u badan)</p> <p>Wuxuu ku dhacaa dumar aad u yar hal qof 1,000kii dumar ahba</p>	<ul style="list-style-type: none"> • dhiigbax buuxin kara laba fayo dhowr oo waaweyn saacadii in ka badan laba jeer • kaa soo baxayaan xinjira dhiig ah oo le'eg xabad liin dhanaana oo yar • Dareemida daciif ama suuxsanaan 	<ul style="list-style-type: none"> • Raadi daryeel caafimaad oo degdeg ah • Ka wac 000 ambalansida aadna Isbitaalka qaybta xaalladaha degdegta ah (adigu gaariga ha wadin, waa in qof ku qaadaa) • Waxaa laga yaabaa inaad u baahato in dhiig lagugu shubo
<p>Infakshan</p> <p>wuxuu ku dhacaa mid boqolkii dumar ahba</p>	<p>Suurtagal:</p> <ul style="list-style-type: none"> • xanuun • dheecaan siyaada ah oo cambarka ka soo baxaya • xumad • daal • shuban • hunqaaco 	<ul style="list-style-type: none"> • Raadi daryeel caafimaad oo degdeg ah • Aarag dhakhtarkaaga, Dhakhtar Guud ama Qaybta Xaalladaha Degdegta ah waana in lagu daweyyaa antibiyooti
<p>Waxyaallaha ka haray ilma qadista</p> <p>Wuxuu ku dhacaa 2 ilaa 5 boqolkii dumar ahba</p>	<ul style="list-style-type: none"> • Cadadka uurka qaarkiis wuxuu ku negaadaa ilma galeenka wuxuuna keenaa dhiigbax joogto ah 	<ul style="list-style-type: none"> • Waxaa laga yaabaa in loo baahdo ku celinta kiniiniga ama qaliin yar si looga soo saaro cadadkaas
<p>Qaliinku ma shaqeyo</p> <p>Waxay ku dhacdaa 2 boqolkii dumar ahba</p>	<ul style="list-style-type: none"> • Astaamaha sii socda ee uurka sida yaqyaqsiga iyo hunqaacada 	<ul style="list-style-type: none"> • kiniiniga daawada ilma iska soo ridida waa lagu celin karaa amase waxaa loo baahan karaa qaliin ku dhicinta ayaa laga yaabaa in loo baahdo*

*Haddii ilma iska soo saaridu aanay dhicin daawada qaadashada ka dib, lagugula talin maayo inaad sii wado uurka sababtoo ah xaalladaha qaarkood waxaa laga yaabaa in daawooyinkii aad qaadatay ay keenaan in ilmuhu si aan sax ahayn uu u abuurmo.

Raadi talo caafimaad haddii:

- Aadan dhiigbaxayn gebi ahaanba 24 saacadood ka dib markaad qaadato misoprostol (kiniiniga labaad)
- Dhiig badani kaa socdo
- Aad leedahay astaamo inaad weli uur leedahay asbuuc ka dib.

Waxaad sidaas samayn kartaa adiga oo la xiriiraya:

- Rugta caafimaadka ee lagu sameeyey ilma soo ridida
- Dhakhtarka guud
- Qaybta xaalladaha dedegta ah ee Isbitaalka kuugu dhow.

Macluumaad intaas ka badan

Xaashidan xaqiiqadu waa mid ka mid ah saddexda xaashiyood ee ku saabsan ilma iska soo-ridida ee Tusaha Tarjumadaha Caafimaadka. Waxaad kaloo aragtaa:

- Ilma-iska soo ridida
- Habka Ilma iska soo ridida – Qaliin

Waxaa ansixisay oo daabacday Xukuumada Fiktooriya, 1 Treasury Place, Melbourne.

© Dawlad Goboleedka Fiktooriya, Wasaarada Caafimaadka iyo Adeegyada Aadamiga, Janaayo 2019

Waxaa laga hellaa <<http://healthtranslations.vic.gov.au/>>